

TIKIDKA BASKA MAGAALADA HOOSE (C-PASS) SU'AALAH INTA BADAN LA ISWEYDIYO (FAQ) EE SHAQAALAH

Sidee ayaan ku heli karaa Tikidka baska Magaalada hoose?

Maadaama milkiilayaasha dhismaha Degmada ay bixiyaan Tikidka baska Magaalada hoose, waa inaad marka koowaad ka shaqeysaa dhismo u qalma. Halkaan waa [qariirada u qalmida](#). Midda labaad, waa inaad sidoo kale shaqeysaa isku celcelis 15 saacadood isbuucii oo aad qorsheysaa ugu yaraan laba bilood. Kadib, la hadal kaliya maamulahaaga HR si aad u heshid Tikidka baska Magaalada hoose.

Illaa intee ayuu barnaamijka socdaa?

Iska diiwaangelinta hadeer way furantahay. Fiiri wakiilka waaxdaada shaqaalaha si aad u ogaatid haddii aad u qalantid.

Tikidyada waxaa la furaa Juun 1, 2018.

Barnaamijka waxaa la maal geliyay illaa Diseembar 31, 2020.

Miyuu tikidkaan baska wax qarash ah igu yahay?

Maya. bilaash ayuu kugu yahay. Milkiilayaasha dhismaha magaalada hoose ee Isgoysyada Caasimada Sare u qaadida Gaarka ah ee Degmada oo ay la jiraan taageerada MORPC ayaa qaada qarashka gelitaanka aan xadidneyn ee nidaamka baska COTA oo dhan ee dadka ka shaqeeyaa degmadooda.

Miyay jiraan tikidka bas gaar ah ee aan helayo?

Haa, C-pass wuxuu u baahanyahay aqoonsi gaar ah, iyo waxaad leedahay dhoor dooqyo. [Xaanshidaan](#) waxay bixisaa dulmarka noocyada aqoonsiga kala duwan. Badroonigaaga ayaa kula shaqeynayo si aad u dooratid aqoonsiga C-pass.

Miyuu app-ka taleefonka casriga ah la shaqeeyaa taleefon walboo casri ah?

App-ka taleefonka casriga ah wuxuu la shaqeeyaa iPhone iyo qalabyada Android. Nasiib daro, lama shaqeyneyso taleefonada Windows waqtigaan.

Miyaan heli karaa labada noocyo ee aqoonsiyada COTA?

Maya. waxaad kaliya oo aad yeelan kartaa hal aqoonsi firfircoon waqtigiiba. Laakin, waad badeli kartaa inta lagu jiro barnaamijka haddii aad rabtid. La xiriir maamulaha akoonkaaga C-pass si aad u cusbooneysid dooqa aqoonsigaaga.

Ma waxaa loogu talagalay C-pass kaliya u aadista shaqada?

Maya. C-pass looguma talogalin kaliya u aadista shaqada. Waxay bixisaa gelitaan aan xadidneyn ee dhammaan wadooyinka COTA waqti walba, maalin walba ee sannadka ah. Taasi waxaa ku jiro dhammaan leemanka joogtada ah iyo wadooyinka gaarka ah sida CMAX, AirConnect iyo Baska Beerta xayawaanka ee ka imaanaya magaalada hoose ee u socdo Beerta xayawaanka Columbus iyo Dhalada kaluunka. C-pass xittaa wuxuu daboolaa qidmooyinka baska ee adeega kubada cagta OSU ee ka imaanayo Darjiinka iyo Raaca Ohio State Fairgrounds (waa inuu bixiyaa baakinka) ama Crosswoods (baakinka waa bilaash) ee aadayo Horseshoe ee maalinta ciyaarta! Waxaa sidoo kale ku jiro adeegyada gaadiidka curyaanka haddii raacaha buuxiyo sharuudaha curyaannimada ([ka fiiri sharuudaha websaydka COTA ee halkaan](#)).

Maxaa dhaco haddii aan ka tago shaqadeyda?

C-pass-kaaga waa la daminayaa sababtoo ah barnaamijka waxaa kaliya oo loo heli karaa shaqaalaha u qalma.

Miyaan amaahin karaa xaaskeyga ama saaxibkeyga C-pass-keyga?

Maya. Haddii aad la wadaagtid tikidkaaga qof kale, waa lagaa saarayaa barnaamijka. Barnaamijkaan waxaa bixiyaa milkiilayaasha dhismaha aaga oo kaliya wuxuu u shaqeeyaa shaqaalaha u qalma ee degmada.

Weligey ma raacin baska. Weli miyaan helayaa C-pass?

Haa! Tikidyada waxba kuguma fadhiyaan, marka maxaadan u helin? Waxaan haynaa [illaha raacista](#) oo badan si aad aad ugu baratid noocyada dooqya walboo raacis ah

Iyo sababtoo ah waxaad heshay tikid, micnaheeda ma ahan waa inaad isticmaashaa maalin walba.

Qeybiyaha CBUS waa qaab wanaagsan ee la iskugu dayo baska. Waa qeybin bilaash ah ee ugu socdaa kor iyo hoos ee High Street ee u dhaxeysa Degmada Brewery/German Village iyo Short North. Qado u aado banaanka ee Short North—wuxuu socdaa 10-15 daqiiqo walba.

Laakin maxaa dhaco haddii dugsiga soo waco iyo canugeyga uu xanuunsanyahay, ama aan u baahnahay inaad shaqeeyo waqti dheeraad ah?

Gohio Commute waxay bixisaa Emergency Ride Home, taas oo bixiso illaa afar raacitaanada baska oo bilaash ah sannadkiiba oo sababahaan ah. Ka booqo [Gohio Commute](#) wixii warbixin dheeraad ah oo buuxi liiska illaha. Waxaad marwalba la xiriiri kartaa Guddiga Qorsheynta Goboleedka Mid-Ohio wixii su'aalo ah ama si aad u codsatid la tashiga dooqyada raacida la badelay (iyo bilaash lagu bixiyay).

Muxuu barnaamijkaan u dhacayaa?

Milkiilayaasha dhismaha magaalada hoose ee Isgoysyada Caasimada Sare u qaadida Gaarka ah ee Degmada way aqoonsantahay in dhibaataada baakinka ay daahineysay hormarka Magaalada hoose. Iyada oo aan jirin xalka baakinka macquulka ah ama qarashka jaban, milkiilayaasha waxay ugu laabteen gaadiidka inay ku caawiyaan fududeynta dhibaataada baakinka. Daraasada 2015 waxay sheegtay in raacida gaadiidka ay ku dhawaadkii labo jibaarantay markii shaqaalaha la siiyay gelitaanka tikidka gaadiidka bilaashka ah.

Su'aalo badan? Waan ku

faraxsannahay inaan caawino. Nagala soo xiriir [\(614\) 591-4184](tel:6145914184) ama info@downtowncpass.com. DowntownCpass.com.

downtown
C-pass
Ride with US